**Xogta dadka khatarta ku jira 2023-2024**

**Xog ku saabsan Waraaqdaan tilmaamaha**

Waraaqdaan ayaa kaaga waramaysa talaalka xili hargabeedka. Waxay diirada saaraysaa dadka ay tahay inay qaataan talaalka, goorta iyo sida ay ku helayaan, iyo sidoo kale xogta kale ee muhiimka ah.

**Fadlan si taxadar leh u akhri.**

**Waa maxay hargabka xiliyeedku (hargabka)?**

Ifiladu (hargabka) waa xanuun caabuq oo daran oo ka dhasha fayraska hargabka. Fayrasku wuxuu ku dhacaa marinnada hawada iyo sanbabooyinka.

Hargabku wuxuu ku dhex wareegaa bulshada inta lagu jiro xili hargabeedka. Xili hargabeedka ayaa caadiyan biloowda biloowga Oktoobar wuxuuna socdaa ilaa dhammaadka Abriil.

**Hargabku ma sababi karaa xanuun daran?**

Haa, hargabka ayaa sababi kara xanuun daran iyo dhibaatooyinka nolosha khatar gelinaaya ayna ku jiraan burukiitada, xanuunka sanbabka iyo, marar dhif ah, hulaaqa maskaxda (encephalitis.

Hargabka ayaa sidoo kale uga sii dari kara dhibaatooyinka dabo dheeraaday ee caafimaadka.

Dadka qaar ayaa khatar dheeri ah ugu jira dhibaatooyinkaan xunxun ayna ku jiraan dadka jira 65 iyo ka wayn, dumarka uurka leh, iyo dadka qaba xanuunnada uur ku jirta sida sonkoroowga iyo xanuunka daran ee sanbabada.

**Waa maxay farqiga u dhexeey qaboowga iyo hargabka?**

Qaboowga ayaa caadiyan wata dhuun xanuun iyo cabur ama duuf badan oo kordhaaya xanuunkiisuna caadiyan waa mid fudud.

Astaamaha hargabka ayaa si degdeg ah ugu biloowda qandho, murqo xanuun, madax xanuun iyo daal xun (dabar daro). Way adkaan kartaa inaad kala saarto astaamaha hargabka iyo astaamaha COVID-19.

**Waa maxay talaalka Hargabku?**

Talaalku waa lad ka caawisa nidaamka difaaca jirka (nidaamka difaaca) si uu ul dgaalamo caabuqyada. Sanad kasta, fayrasyada hargabka ayaa isbadela, marka sanad kasta talaalka hargabka ayaa isbadella si uu u baxsho difaac ka dhan ah noocyada cusub ee fayrasyada hargbka ee la filaayo.

**Sidee talaalka hargabku u shaqeeyaa?**

Talaalka hargabku wuxuu ka caawiyaa nidaamka difaacaagu inuu sameeyo difaacyada jirka (barotiinnada la dagaalama caabuqa). Haddii aad qaadatay talaalka hargabka uuna kugu dhaco fayraska hargabku, talaalka ayaa kaa difaacaaya inaad jirato.

**Yay tahay inuu qaato talaalka Hargabka?**

Waxaan talaallada Hargabka kula talinaynaa:

- Dadka jira 65 sano iyo kawayn
- Carruurta jira 2-12 sano (fadlan akhri xaashida xogta ee HSE ee talaalka hargabka carruurta)

- Haweenka uurka leh (fadlan akhri xaashida xogta ee HSE ee talaalka hargabka haweenka uurka leh)
- Dadka (waawayn iyo carruurba) qaba xanuunnada dabo dheeraada sida sonkoroowga, xanuunnada xun ee Wadnaha, xanuunnada sanbabada, xanuunnasa kalyaha iyo xanuunka xun ee sanbabada oo uu ku jiro COPD, iyo cudurada neerfaha
- Dadka qaba kansarka
- Dadka mudada dheer cunaayay aspirin-ka
- Dadka nidaamkooda difaaca jirtu daciifay sabab la xiriirta cudur ama daawo
- Dadka aadka u buuran oo miisaanka jirkoodu (BMI) ka badan yahay 40
- Dadka qaba Down syndrome
- Dadka dagan guryaha kalkaalinta iyo xarumaha kale ee mudada dheer la joogo
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka
- Daryeeleyaasha
- Dadka ku nool isla guriga qof khatar wayn ugu jira hargabka sabab la xiriirta xanuun xun
- Dadka sida joogtada ah ula jooga hilibka doorada, cawlada biyaha ama khaansiirada.

**Waa maxay talaallada hargabka ee la heli karo xili hargabeedkaan?**

Barnaamijka talaalka xili hargabeedka ee 2023-2024 HSE ayaa bixin doona 2 talaal:

- Influvac Tetra, oo ay samayso Mylan looguna talo galay xanuunnada mudada dheer iyo dadka jira 65 sano iyo ka wayn
- Talaalka hargabka ee sanka lagu buufiyo ee Fluenz Tetra (noolaha ka samaysan, ee sanka) ayna samayso AstraZeneca AB looguna talo galay carruurta jira 2-17 sano

**Maxay dadka jira 65 sano iyo ka wayn ugu baahan yihiin talaalka hargabka?**

Dadka jira 65 sano iyo kawayn ayaa khatar dheeri ah ugu jira xanuun daran, isbitaal dhigis ama geeri uga timaada hargabka. Talaallada Hargabku waa difaaca ugu fiican ee looga hortago hargabka.

**Maxay dumarka uurka leh ugu baahan yihiin talaalka hargabka?**

Haddii aad uur leedahay, waxaad khatar wayn ugu jirtaa dhibaatooyin kaaga yimaada hargabka. Hargabka ayaa sidoo kale saamayn kara ilmahaaga, tusaale, hargabka ayaa sababi kara dilan, dhicis ama xataa ilmo uurka ku mayda.

Talaalka hargabka ayaa difaacaaya haweenka uurka leh inta ay uurka leeyihiin oo sidoo kale difaacaaya ilmahooda dhashay inta lagu jiro dhawrka biloow ee ugu horeeya.

Haddii aad uur leedahay, fadlan akhri waraaqda xogta hargabka ee HSE ee haweenayda uurka leh.

**Badqab intee dhan ayuu leeyahay talaalka hargabku?**

Talaallada hargabku aad ayuu amaan u yahay. Talaallada hargabka waxaa la siinaayay in ka badan 60 sano malaayiin dad ah caalamka oo idil.

**Waa maxay dhibaatooyinka ka dhalan kara talaalka?**

Ciladaha ka dhalan kara ee ugu badan waa kuwo yar. Kadib talaallada Hargabka waxaad yeelan kartaa cilado ka dhasha sida xanuunka, gaduudashada iyo bararka meesha cirbada lagaaga dhuftay. Madax xanuun, murqe xanuun iyo daal ayaa sidoo kale jiri kara. Ciladahaan ka dhalan kara ayaa socon kara dhawr maalmood.

Xasaasiyadaha daran waa kuwo dhif ah; xasaasiyad alarji oo xun ayaa ku dhacda mid kamid ah milyankii qof ba.

**Talaalka hargabku ma igu ridi karaa hargab?**

Maya. Talaalka hargabku kuguma ridi karo hargabka.

**Maxaan ugu baahan nahay talaalka Hargabka sanad kasta?**

Sanad kasta, fayrasyada hargabka ee socda ayaa isbadela, marka sanad kasta qaybaha talaalka hargabka ayaa isbadella si uu u baxsho difaac ka dhan ah noocyada cusub ee fayrasyada hargbka ee la filaayo. Talaalka hargabka ayaa ka hortaga 4 nooc oo kala duwan oo fayraska hargabka ah.

**Muddo intee le'eg ayay daawada ku qaadanaysaa inay shaqayso?**

Talaalku wuxuu bilaabayaa inuu shaqeeyo labo asbuuc gudahood.

**Talaalka hargabku ma iga difaaci doonaa COVID-19?**

Maya. Talaalka hargabku kaama difaaci karo COVID-19. Waa muhiim inaad qaadato lababada talaalka hargabka iyo talaalka COVID-19. Tan waxaa sabab u ah in Hargabka iyo COVID-19 ay sababaan fayrasyo kaladuwan.

Hargabka iyo COVID-19 ayaa labaduba keeni kara xanuun daran haddii aad qaadatana waxaad u baahan kartaa in lagu dhigo isbitaalka. Way adkaan kartaa inaad kala saarto astaamaha hargabka iyo astaamaha COVID-19.

Haddii aad qaadatay talaalka COVID-19 wali waa inaad qaadataa talaalka hargabka.

Waxaad qaadan kartaa talaallada COVID-19 isla marka aad qaadanayso talaalka hargabka haddii laguu yabooho.

**Yay tahay inuusan qaadan talaalka Hargabka?**

Waa **inaadan** qaadan talaalka hargabka haddii aad xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday kuuro hore oo kamid ah talaalka hargabka ama qayb kamid ah talaalka.

Waa inaadan qaadan talaalka hargabka haddii aad qaadato Labaad daawooyinka loo yaqaano isku dhafka isku dhafan ee baxnaaninta (tusaale, ipilimumab lagu daray nivolumab) kuwaasoo lagu daweeyo kansarka.

Waa inaadan qaadan wax talaalka hargabka ah haddii aad qabto neutropoenia aad u xun *heerarka hooseeya ee nooca unugyada dhiiga cad); marka laga reebo dadka qaba autoimmune neutropenia rasmiga ah.

**Ka waran dadka xasaasiyada ku qaba ukunta?**

Inta badan dadka xasaasiyada ku qaba ukunta ayaa xasaasiyad ku qabi kara talaalka hargabka. Kala hadal GP gaaga (Dhakhtarka) ama farmashiilaha.

Goorma ayay tahay inaad dib u dhigto qaadashada talaalka hargabka?

Waxaa jira sababo aad u yar oo ay tahay in dib loogu dhigo qaadashada talaalka hargabka. Waxaad dib u dhigi kartaa qaadashada talaalka hargabka haddii aad xanuunsan tahay – aad qabto qandho ka badan 38$^{o}$C – ilaa aad ka bogsoonayso.

**Xagee ayaan ka helayaa talaalka hargabka haddii aan kamid ahay kooxaha talaalka lagula taliyay?**

Waxaad ka helaysaa talaalka hargabka dhakhtarkaaga guud (Dhakhtarka) ama farmashiilaha.

Haddii aad tahay shaqaale caafimaad, goobtaada shaqada ayaa talaalka kugu siinaysa adoo shaqada ku jira.

Waa meeqa talaalka hargabku?

Haddii talaalka hargabka lagugula taliyay, markaas talaalka iyo la tashiga GP gaaga (dhakhtarka) ama farmashiiluhu waa bilaash.

Fadlan balan ka qabso Dhakhtarkaaga Guud (Dhakhtarka) ama farmashiilaha hadda.

**Tallada: Talaalka kolba-aariyada**

Haddii aad jirto 65 sano ama ka wayn tahay aadna qabto xanuun dabo dheeraaday, waa inaad sidoo waydiisaa GP gaaga (Dhakhtarka) ama farmashiilaha xogta talaalka kolba-aariyada, taasoo kaa difaacaaya kolba-aariyada. Waxaad caadiyan u baahan tahay talaalka kolba-aariyada **halmar.** Waxaad helaysaa talaalkaan isla maalinta aad qaadanayso talaalka hargabka.

Si aad u hesho xog dheeraad ah ka fiiri: www.hse.ie/flu.

Waxaad sidoo kale heli kartaa lifaaqyada aad ka helayso waraaqaha xogta ee bukaanka oo ka hadlaaya talaallada barta **www.hpra.ie.** Raadi Influvac Tetra.

**Bayaanka Sirta**: Si talaalka loogu baxsho si amaan ah, loona qoro dhammaan xogta muhiimka ah ee la socoshada iyo maareynta talaallada, HSE ayaa ka shaqeyn doonta xogta shaqsiga ah ee cunugaaga. Dhammaan xogta ay ka shaqeyso HSE ayaa la waafajin doonaa sharciyada kaladuwan ee difaaca xogta ayna ku jiraan Sharciyada Difaaca Xogta 1988-2018, qaanuunka (EU) 2016/679 (Qanuunka Difaaca Xogta Guud, GDPR), iyo Sharciga Aqoonsiyada Caafimaadka 2014. Adeegsiga xogta cunugaaga ayaa noqon doonto mid sharciga waafaqsan oo cadaalad ah. Waxaa keliya loo adeegsan doonaa ujeedooyin gaar ah ayna ku jiraan, maareynta talaallada, soo sheegista iyo la socoshada barnaamijyada talaalka, xaqiijinta macaamiisha iyo bixinta daryeelka caafimaadka. U kala gudbinta xogta waaxaha HSE ayaa sidoo kale la samayn karaa

**National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaranka)**

**www.hse.ie/flu**

**Koodhka Amarka: HNI00719**

**Agoosto 2023**